# Waxaan dhumiyey ku jiridii kaarkaygii caafimaadka ee MA ama MinnesotaCare Maxaan sameeyaa?

I Lost my MA or MinnesotaCare. What do I do?

## Ha dhumin ku jirida Kaarkaaga Caafimaadka

Xilligii cudurku uu dillaacay, khasab ma ahayn inaad cusboonaysiiso Kaarkaaga Caafimaad ee Dowladda ee [Medical Assistance (MA)] ama MinnesotaCare. Arrintani waxa ay dadka ka ilaalisay inay noqdaan kaar caafimaad la'aan xilligii cudurku uu dillaacay. Laakiin iminka waa inaad u cusboonaysiisaa siddii markii hore! **Haddii aad cusboonaysiiso, ma aha inaad dib-u-codsato.**

Si aadan u noqon kaar caafimaad la'aan:

1) **Hubi in akhbaartaada la soo xiriiriddu ay sax tahay si kolkaa aad u hesho ogaysiiska cusboonaysiinta.** Haddii adiga ama qof kale oo qoyskaaga ka mid ahi uu haysto **MA,** wac degmadaadda ama qabiilka aad ka tirsan tahay (county or tribe) si aad u cusboonaysiiso akhbaartaada la soo xiriirida. Haddii aad haysato kaarka **MinnesotaCare**, ka wac hay'adda Gargaarka Macmiladda Daryeeladda Caafimaad (Health Care Consumer Support) khadka 651-297-3862 ama 800-657-3672.

   Waxaa jira siddoo kale ka eegid Cusboonaysiinta oo khadka (online) ah ee barta https://mn.gov/dhs/renewmycoverage/.

2) **Buuxi warqadahaaga cusboonaysiinta markiiba marka aad hesho.** Wax badan arrintan ka ogow adigoo akhrinaya warqadayada xogta aruursan ah ee, *Cusboonaysiinta Kaarkayga Caafimaadka ee* [*Medical Assistance (MA)] ama MinnesotaCare*.

Hadii aad waydo kaarkaaga caafimaadka ee MA ama MinnesotaCare, waxa aad u baahan tahay inaad dib-u-codsato.

## 1. Waxa aad dib-u-codsan kartaa kaarka MA ama MinnesotaCare markii aad rabto

Xeerarka xaq u yeeladka kaarka MA ama MinnesotaCare waa ay isbedeli karaan. Haddii heerka dakhligaaggu ama baahidaadda caafimaad isbedesho, dib-u-codso xataa haddii horey mar laguugu diiday. Ma jiraan wax xadidaad ah oo ku saabsan inta goor ee aad codsan karto. Haddii aad doonayso inaad dib-u-codsato:



- gal shabarakadda (website) MNsure

  AMA

- ka wac Xafiiska Caawinta ee Barnaamijyadda Daryeeladda Caafimaadka ee Minnesota khadka ah 651-431-2670 ama 1-800-657-3739 saacadaha u dhaxeeya 8 subaxnimo (a.m.) ilaa iyo 4:15 galabnimo (p.m.) Isniinta ilaa iyo Jimcaha.

  AMA

- Kala xiriir Barnaamijka Daryeel (Project Care) si aad uga hesho **caawimaad bilaash ah** xiriiriye sharciyeysan oo MNsure u shaqeeya khadka ah 320-253-0121 ama barta projectcare@mylegalaid.org.

## 2. Waxaa dhici karta inaad ka heli karto kaar caafimaad oo tayo leh oo qiimo jaban ah Mnsure.

Haddii aad sameysay cusboonaysiin laguuna diiday kaarka MA ama kan MinnesotaCare iyadoo sababtu tahay inaadan xaq u lahayn wixii markaa ka dambeeya, waxaa dhici karta inaad ka hesho kaar caafimaad oo aan ahayn kan dowladda MNsure. Waxa aad haysataa 60 cisho laga bilaabo maalinta uu kaarkaaga MA ama MinnesotaCare kaa istaago inaad ku doorato kaar aan ahayn kan dowladda. Kaarkaagu inuu shaqeeyo waxa ay bilaabmi maalinta ugu horeeysa bisha xigta ka dib kolka aad is-qorto.



Kaararka MNsure waa:

- **Jaban yihiin.** Dadka intiisa badani waa ay dhimi karaan lacagta ay bil walba bixiyaan iyo inta lacag ah ee ay bixinayaan kolka ay daryeel helaan. Lacagta baaqanaysaa waxa ay ku xiran tahay dakhliga iyo baaxadda qoyska.

- **Buuxa.** Dhamaan kaararku waxa ay bixiyaan lacagta booqashada dhaqtaradda, dawooyinka la soo qoro, Daryeelka degdeg ah ee isbitaaladda, daryeeladda caafimaadka madaxa, isbitaal jiifinta, iyo waxyaabo kale oo badan.

- **Sahal.** Is-qoriddu waa fududahay dadka intiisa badanina waxa isku diiwaan-gelin karaan hal fadhi.

Si aad isu qorto kaarka MNsure:

- Booqo shabakadda MNsure.org si aad u hesho isuna qorto kaar caafimaad oo kugu haboon

  AMA

- Wac ama emayl ugu dir ciwaanka Barnaamijka Daryeel Project Care si aad uga hesho **caawimaad bilaash ah** xiriiriye sharciyeysan oo MNsure u shaqeeya khadka ah 320-253-0121 ama barta ah projectcare@mylegalaid.org

## 3. Eeg in shaqadaaddu ay fidiso kaar caafimaad iyo in kale.

Shaqadaaddu waxaa dhici karta inay bixiso kaar caafimaad. Ula hadal qoladda shaqada sidda si ugu dhaqsaha badan. Haddii shaqaddu ay bixiso kaar caafimaad, waxa dhici karta inaad haysto waqti kooban oo aad isku qorto.

## 4. Kaarka Medicare ma leeyahay ganaax ah ka soo daaha isqoridda?

Haa. Laakiin haddii aadan is-qorin kaarka Medicare kolkii aad markii ugu horeeysay xaq u yeelatay, waxa aad haystaa waqti kooban oo aad isku qorto adigoon bixinayn ganaaxa ka soo daahida isqorida. Tan waxaa la yiraa “Mudadda Isqorida ee Gaarka ah.” Mudadaadda Isqorida ee gaarka ahi waxa ay bilaabantaa maalinta aad hesho ogaysiiska ah in kaarkii MA uu kaa istaagayo. Mudaddan Isqorida gaarka ah waxa ay socotaa 6 bilood ka dib kolka kaarka MA uu kaa dhamaado.

Kaarkaaga Medicare waxa uu bilowdaa bil ka dib kolka aad isqorto, ama maalinta uu kaarkaaga MA kaa dhamaado. Adiga ayaa dooran kii aad rabto.

Wixii akhbaar dheeraad ah ee ku saabsan Mudadda Isqorida ee Gaarka ah iyo sidda la isu qoro, ka eeg shabakadda (webiste) Medicare. Ama wac khadka 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227). Isticmaalayaasha Dhagaha culusi (TTY) ha wacaan: 1-877-486-2048.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**